

Waxaa laga yaabaa in saraakiil kala duwan su'aalo ku weydiiyaan, oo ay kamid yihiin saraakiisha gobolka iyo kuwa degaanka, Kooxaha La Dagaalanka Argagixisada, saraakiisha FBI, Wasaaadda Arrimaha Gudaha (oo ay ka mid yihiin Ciidamada Socdaalka iyo Ilaalinta Xuduudaha), Ciidanka La Dagaalanka Maandooriyayaasha, Dambi baarayaasha Mileteriga, ama hay' dahaha kale

Waxa aad xaq u leedahay in aad iska aamusnaato sida uu dhigayo dastuurka. Guud ahaan, waajib kuguma aha in aad la hadasho ciidanka nabadgelyada (ama qof kalaba), xitaa haddii aadan xor aheyn oo aadan ka tagi karin saraakiisha, ama aad xiran tahay ama xabsi lagu dhigo. Laguguma ciqaabi karo haddii aad diido in aad ka jawaabto su'aalaha. Waxaa haboon in aad qareen la hadasho ka hor inta aadan ka jawaabin su'aalaha. Guud ahaan, qaali ayaa ku amri kara in aad ka jawaabto su'aalaha. (Dadka aan heysan dhalashada waa in ay akhriyaan [Qeynta IV \(Section IV\)](#) si ay uga helaan macluumaad dheeraad ah.)

Haa, waxaa jira laba xaaladood oo ka baxsan. Marka koowaad, mararka qaarkood, waa in aad u sheegtaa magacaaga ciidanka nabadgelyada haddii lagu weydiiyo oo lagu yiraahdo aqoonsigaaga sheeg. Xitaa haddii aad magacaaga sheegto, waajib kuguma aha in aad ka jawaabto su'aalaha. Midda labaad, haddii adiga oo gaari wada ciidamadu ku joojiyaan, saraakiishu waxa ay waajib kaaga dhigi karaan in aad tusto leesinkaaga, lahaanshaha gaariga iyo ceymiska gaariga (laakiin kuma khasbanid in aad su'aalaha ka jawaabto). (Dadka aan heysan dhalashada waa in ay akhriyaan [Qeynta IV \(Section IV\)](#) si ay uga helaan macluumaad dheeraad ah.)

